# Suurat Adh-Dhuur

# سُورَةُ الطُّورِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa Ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Eebe wuxuu ku dhaartay) Dhuurisiina.

وَٱلطُّورِ ١

2. Iyo Kitaabka la dhigay,

وَكِتَٰبٖ مَّسۡطُورٖ ٢

3. Oo ku qoran warqado la fidiyay.

فِي رَقّٖ مَّنشُورٖ ٣

4. Iyo Gurigii cammirraa (Beytulmacmuur).

وَٱلۡبَيۡتِ ٱلۡمَعۡمُورِ ٤

5. IYo saanqaafka la koryeelay (cirka).

وَٱلسَّقۡفِ ٱلۡمَرۡفُوعِ ٥

6. Iyo Baddii la kululeeyay.

وَٱلۡبَحۡرِ ٱلۡمَسۡجُورِ ٦

7. Ee caddibaadda Eebe waa wax dhici (sugan)

إِنَّ عَذَابَ رَبِّكَ لَوَٰقِعٞ ٧

8. wax celinna ma jiro.

مَّا لَهُۥ مِن دَافِعٖ ٨

9. Waxay dhici caddibaaddaas Maalinta Samadu wareegi.

يَوۡمَ تَمُورُ ٱلسَّمَآءُ مَوۡرٗا ٩

10. Buuruhuna socon.

وَتَسِيرُ ٱلۡجِبَالُ سَيۡرٗا ١٠

11. Halaagna waxaa iska leh maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

فَوَيۡلٞ يَوۡمَئِذٖ لِّلۡمُكَذِّبِينَ ١١

12. Ee ah kuwa tiimbashada xumaanta ku dhex ciyaari.

ٱلَّذِينَ هُمۡ فِي خَوۡضٖ يَلۡعَبُونَ ١٢

13. Maalinta Naarta xoog loogu tuurina (waxaa lagu dhihi).

يَوۡمَ يُدَعُّونَ إِلَىٰ نَارِ جَهَنَّمَ دَعًّا ١٣

14. Waatan Naartii aad beenin jirteen.

هَٰذِهِ ٱلنَّارُ ٱلَّتِي كُنتُم بِهَا تُكَذِّبُونَ ١٤

15. Ma sixirbaa, mase waxbaydaan arkayn.

أَفَسِحۡرٌ هَٰذَآ أَمۡ أَنتُمۡ لَا تُبۡصِرُونَ ١٥

16. Gala, ama samra ama ha samrine, waa isugu kiin mid, waxaa uun laydinka abaalmarin waxaad camal falayseen.

اصْلَوْهَا فَاصْبِرُوٓا۟ أَوْ لَا تَصْبِرُوا۟ سَوَآءٌ عَلَيْكُمْ
إِنَّمَا تُجْزَوْنَ مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٦﴾

Eebe wuxuu ku dhaaran makhluuqaadkiisa ku tusin qudradiisa, sida Buurta Dhuuri-Siina; Kitaabka la dhawray, Quraanka, Beytul-macmuur, Cirka dhulka, badda iyo wixii la mid ah, intaas, oo dhanna waxaa lagu xoojin in ciqaabta Eebe oo xumaanlowga u darbay sugantahay, wax reebina uusan jirin, Maalinta qiyaamana xaq diidayaasha lagu abaal marin ciqaab daran, maxaayeelay waxayku madax adkaadeen oo dabbaasheen Wabigii xumaanta, Eebana ma dulmiyine iyagaa is dulmiyay. Adh-Dhuur (1-16).

---

17. Kuwa Eebe ka dhawrsaday waxay gali Jannooyin iyo Nicmo.

إِنَّ ٱلْمُتَّقِينَ فِى جَنَّٰتٍ وَنَعِيمٍ ﴿١٧﴾

18. Iyaga oo ku raaxaysan waxa Eebe siiyay, Eebohoodna wuxuu ka dhawray caddibaadda Jaxiimo.

فَٰكِهِينَ بِمَآ ءَاتَىٰهُمْ رَبُّهُمْ
وَوَقَىٰهُمْ رَبُّهُمْ عَذَابَ ٱلْجَحِيمِ ﴿١٨﴾

19. (Waxaana lagu dhihi) cuna oo cabba idinkoo shifaysan camalkiinnii dartiis.

كُلُوا۟ وَٱشْرَبُوا۟ هَنِيٓـًٔا بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿١٩﴾

20. Idinkoo ku dangiiga Sariiro la safay, waxaanna (Eebe) u guurin Haween Janno(Xuuralcayn).

مُتَّكِـِٔينَ عَلَىٰ سُرُرٍ مَّصْفُوفَةٍ وَزَوَّجْنَٰهُم بِحُورٍ عِينٍ ﴿٢٠﴾

21. Kuwa xaqa rumeeyay ee carruurtooduna Iimaanka ku raacday waxaannu haleeshiin carruurtooda (Darajada iyo naxariista), camalkoodana waxba kama nusqaaminayno, Ruuxwalbana wuxuu kasbaday yuu u rahmanaan «u xidhnaani».

وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَٱتَّبَعَتْهُمْ ذُرِّيَّتُهُم بِإِيمَٰنٍ أَلْحَقْنَا
بِهِمْ ذُرِّيَّتَهُمْ وَمَآ أَلَتْنَٰهُم مِّنْ عَمَلِهِم مِّن شَىْءٍ
كُلُّ ٱمْرِئٍۭ بِمَا كَسَبَ رَهِينٌ ﴿٢١﴾

22. waxaannu u badinnay faakiho iyo Hilib oo ah waxay jecelyihiin.

وَأَمْدَدْنَٰهُم بِفَٰكِهَةٍ وَلَحْمٍ مِّمَّا يَشْتَهُونَ ﴿٢٢﴾

23. Waxayna isku siin Jannada dhexdeeda (iyagoo sheekeysan) Weel (Macaan) kabuuxo, oon hadal xun iyo dambi midna lahayn.

يَتَنَٰزَعُونَ فِيهَا كَأْسًا لَّا لَغْوٌ فِيهَا وَلَا تَأْثِيمٌ ﴿٢٣﴾

24. Waxaana u adeegi wiilal aad moodo Jawhar la dhawray.

۞ وَيَطُوفُ عَلَيْهِمْ غِلْمَانٌ لَّهُمْ كَأَنَّهُمْ لُؤْلُؤٌ مَّكْنُونٌ ﴿٢٤﴾

Kuwa Eebba caabuda xumaantana ka dhawrsada wuxuu Eebbe ku abaal-marin Janno iyo wanaag, iyaga iyo carruurtoodii xaqa rumeeyayba'siduu ka wariyay Dhabaraani Ibna-Cabbaas (wuxuu yidhi waxaan u malayn nabigu «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebbe ha yeelee» inuu yidhi (Marka Ruuxu Jannada galo yuu warsadaa labadiisii waalid iyo haweenaydiisii iyo carruurtiisii markaasaa la dhihi ma ayan gaadhin darajadaada, markaasuu dhihi'Eebbow waxaan u camalfalay naftayda iyo tooda, markaasaa la fari in la haleeshiiyo).
Camal cid fashayna lagama nusqaamiyo, waxay ehlu jannuhu doonaanna waxay ka heli dhexdeeda, muran, hadal xun iyo dambina ma yaallo Jannada dhexdeeda, Ee waa uun wanaag nicmo iyo raaxo. Adh-Dhuur (17-24).

25. Qaarkood (ehlu-Jannaha) yaa qaarka kale qaabila iyagoo wax is waydiin.

وَأَقْبَلَ بَعْضُهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ يَتَسَآءَلُونَ ﴿٢٥﴾

26. Waxayna isu dheheen waxaan ahayn horay Adduunkii kuwo ehelkoodii dhexdiisa ku cabsada.

قَالُوٓا۟ إِنَّا كُنَّا قَبْلُ فِىٓ أَهْلِنَا مُشْفِقِينَ ﴿٢٦﴾

27. Eebaase nagu mannaystay (dambi dhaaf), wuxuuna naga dhawray caddibaadda Samuumka (Jahannama).

فَمَنَّ ٱللَّهُ عَلَيْنَا وَوَقَىٰنَا عَذَابَ ٱلسَّمُومِ ﴿٢٧﴾

28. Waxaan ahayn horay kuwo barya Eebe, Ilaahayna waa Baarri naxariista.

إِنَّا كُنَّا مِن قَبْلُ نَدْعُوهُ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلْبَرُّ ٱلرَّحِيمُ ﴿٢٨﴾

29. Ee waani (Nabiyow dadka), nicmada darteed ma tihid wax sheege iyo waalane midnee.

فَذَكِّرْ فَمَآ أَنتَ بِنِعْمَتِ رَبِّكَ بِكَاهِنٍ وَلَا مَجْنُونٍ ﴿٢٩﴾

30. Mise waxay dhihi waa gabayaa ee aan la sugno Geerida.

أَمْ يَقُولُونَ شَاعِرٌ نَّتَرَبَّصُ بِهِۦ رَيْبَ ٱلْمَنُونِ ﴿٣٠﴾

31. Waxaad dhahdaa suga anna waan idin la sugiye.

قُلْ تَرَبَّصُوا۟ فَإِنِّى مَعَكُم مِّنَ ٱلْمُتَرَبِّصِينَ ﴿٣١﴾

32. Mise caqligooda (xun) yaa saas faray, ma aha ee waa Qoom xadgudbay.

أَمْ تَأْمُرُهُمْ أَحْلَٰمُهُم بِهَٰذَآ ۚ أَمْ هُمْ قَوْمٌ طَاغُونَ ﴿٣٢﴾

33. Mise waxaydhihi isagaa abuurtay (Quraanka) waxba ma ayan rumeynin.

أَمْ يَقُولُونَ تَقَوَّلَهُۥ ۚ بَل لَّا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٣﴾

34. Ha la yimaadeen hadal la mid ah hadday Run sheegi.

فَلْيَأْتُوا۟ بِحَدِيثٍ مِّثْلِهِۦٓ إِن كَانُوا۟ صَٰدِقِينَ ﴿٣٤﴾

Ehlu-Jannaha Eebaa u nicmeeyay, waxayna ku kulmi Jannada dhexdeeda iyagoo is warsan dhibaatadii adduunka iyo say Eebe uga cabsanjireen iyo siduu ugu naxariistay wanaagna ugu mannaystay, maxaayeelay Ilaahay waa samafale, tan kale Nabigu (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) waa Raxmad Eebe soo diray, Jirro, waalli, iyo wax xumaan ahna ma qabo, Quraankuna waa kalaamkii Eebe, Haddii kale ha keeneen gaaladu iyo beenaalayaashu wax Hadalkii la mid ah ama ku soo dhaw, lagama yaabo taasna waligeed. Adh-Dhuur (25-34).

---

35. Mise waxaa la abuuray abuure la‘aan, mise iyagaa abuuray (naftooda).

أَمْ خُلِقُوا۟ مِنْ غَيْرِ شَىْءٍ أَمْ هُمُ ٱلْخَٰلِقُونَ ﴿٣٥﴾

36. Mise iyagaa Samaawaadka iyo Dhulka abuuray, saas ma aha ee wax ma ayan yaqiininin.

أَمْ خَلَقُوا۟ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ ۚ بَل لَّا يُوقِنُونَ ﴿٣٦﴾

37. Mise agtoodaa khayraadka Eebe yaallaa, Mise iyagaa xisaabin dadka.

أَمْ عِندَهُمْ خَزَآئِنُ رَبِّكَ أَمْ هُمُ ٱلْمُصَيْطِرُونَ ﴿٣٧﴾

38. Mise waxay leeyihiin Sallaan ay wax ku Dhageeystaan, ha la yimaado kooda wax dhaagaystay xujo cad.

أَمْ لَهُمْ سُلَّمٌ يَسْتَمِعُونَ فِيهِ فَلْيَأْتِ مُسْتَمِعُهُم بِسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿٣٨﴾

39. Mise Eebaa Gabdho u sugnaaday idinkana wiilal.

أَمْ لَهُ ٱلْبَنَٰتُ وَلَكُمُ ٱلْبَنُونَ ﴿٣٩﴾

40. Mise waxaad warsan Nabiyow ujuuro, oo markaas ku cuslaatay.

أَمْ تَسْـَٔلُهُمْ أَجْرًا فَهُم مِّن مَّغْرَمٍ مُّثْقَلُونَ ﴿٤٠﴾

41. Mise waxa maqanbaa agtooda ah oo ay qoraan.

أَمْ عِندَهُمُ ٱلْغَيْبُ فَهُمْ يَكْتُبُونَ ﴿٤١﴾

42. Mise Dhagar Bay Rabaan, kuwa gaaloobay iyagaa dhakran.

أَمْ يُرِيدُونَ كَيْدًا فَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ هُمُ ٱلْمَكِيدُونَ ﴿٤٢﴾

43. Mise Ilaah Eebe ka soo hadhay leeyihiin, Eebaa ka fog waxay la wadaajiyeen « Ilaah-nimada ».

أَمْ لَهُمْ إِلَٰهٌ غَيْرُ ٱللَّهِ سُبْحَٰنَ ٱللَّهِ عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٤٣﴾

Aayadahan waxay waran dilaa ah ku yihiin dhuunta gaalada, mulxidiinta ah iyo diinlaawayaasha diidi oo inkiri Illaaheenna wayn ee sharafta leh ee abuuray Caalamka iyo wax kasta, kuwaas doqommada ah ee isla waynida ku darsaday waxay inkiri Ilaaheen iyo abuurkiisa, Aayaduhuna waxay la hadli ciddii wax yar oo fikir ah ama caqli ah ku jirto, maxaa yeelay khalqiga, dadleh Cir leh ee dhul leh, ee Bad leh, ee Xiddigo leh ee xayawaan leh waxayna ka baxsanayn Saddex xaalo midkood,

1. Inay iska abuurmeen khaaliq abuuray la‘aan.
2. Inay iyagu is abuureen Naftooda.
3. Iyo in cid kale abuurtay oo ahaysiisay, tan hore iyo tan labaadba waa wax kama jiraan, Cid is abuurtayna ma jirto, mid iska abuurantayna ma jirto, wixii wax garad ahna ama caqli lehna saasuu rumaynsanyahay, waxaa soo hadhay, tan sadexaad oo ah in cid wax abuurtay jirto oo makhluuqaadka ka duwan'waana arrin dhab ah waana Ilaaheenna Caalamka ahaysiiyay xaggiisana u ahaan'awoodna ku dhammaato, Mu‘miniintuna ay rumasanyihiin wanaagna ku abaalmarin.

Bukhaari iyo Muslim waxay ka wariyeen Jubayr Binu Mudhcim inuu yidhi: Waxaan maqlay nabiga oo makhrib akhrin (Suuradda) Dhuur markuu gaadhay Aayaddan (Mise waxaa la abuuray Abuure la‘aan): Qalbigaygu wuxuu u dhawaaday inuu duulo. Adh-Dhuur (35-43).

---

44. Hadday arkaan goosin ka mid ah Samada oo soo dhacaysa waxay odhan waa Daruuro is dulsaaran (madax adayg dartiis).

وَإِن يَرَوْا۟ كِسْفًا مِّنَ ٱلسَّمَآءِ سَاقِطًا يَقُولُوا۟ سَحَابٌ مَّرْكُومٌ ﴿٤٤﴾

45. Ee iskaga tag Nabiyow intay kala kulmaan maalinta dhexdeeda lagu halaagi doono.

فَذَرْهُمْ حَتَّىٰ يُلَٰقُوا۟ يَوْمَهُمُ ٱلَّذِى فِيهِ يُصْعَقُونَ ﴿٤٥﴾

46. Maalinta ayan dhagartoodu wax u taraynin wax u gargaarana uusan jirin.

يَوْمَ لَا يُغْنِى عَنْهُمْ كَيْدُهُمْ شَيْـًٔا وَلَا هُمْ يُنصَرُونَ ﴿٤٦﴾

47. Kuwa xad gudbay waxaa u sugnaaday caddibaad ka sokaysa (Qiyaamada), laakiin badankoodu ma oga.

وَإِنَّ لِلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ عَذَابًا دُونَ ذَٰلِكَ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٤٧﴾

48. Ee ku samir xukunka Eebahaa (Nabiyow) annagaa ku ilaalinaynee, kuna; tasbiixso oo ku mahadi Eebahaa markaad kici.

وَٱصْبِرْ لِحُكْمِ رَبِّكَ فَإِنَّكَ بِأَعْيُنِنَا ۖ وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ حِينَ تَقُومُ ﴿٤٨﴾

49. Habeenka qaarkiisna tuko, iyo marka xiddiguhu jeedsadaan.

وَمِنَ ٱلَّيْلِ فَسَبِّحْهُ وَإِدْبَٰرَ ٱلنُّجُومِ ﴿٤٩﴾

Madaxadayggu gaalo wax u tarimahayo marka ciqaabta Eebe timaaddo, khiyaamo, dhagar iyo xumaanna Eebe wax kama dhibto, ee waxay wax yeeli cidda la timid uun, Adduunkana Eebe waa karaa inuu ku ciqaabo xumaanlowga (sida dhacda in badan). Aakhirana waa u dheertahay ciqaabteedii, waxaase Eebe Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) faray ummaddiisuna waa la mide inuusan u walbahaarin xumaanlowga ee uu xaqa tusaa’kuna samraa’kaddibna wax kama dhibayso ciddii dhunta, maxaayeelay Eebaa awoodda leh, waana in tasbiixda Eebe’mahaddiisa, Salaadda iyo ka yaabiddiisana la badiyo si kastoo la yahayba. Adh-Dhuur (44-49).

## Suurat An-Najm

## سورة النجم

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista:

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Wuxuu ku dhaartay (Eebe) Xiddiggu markuu hoobto.

وَٱلنَّجْمِ إِذَا هَوَىٰ ﴿١﴾

2. Ee saaxiibkiin (Nabigu) ma dhumin, xaqana kama leexan.

مَا ضَلَّ صَاحِبُكُمْ وَمَا غَوَىٰ ﴿٢﴾

3. Kumana hadlo hawadiisa.

وَمَا يَنطِقُ عَنِ ٱلْهَوَىٰٓ ﴿٣﴾

4. quraankuna waxaan waxyi Eebe ahayn ma aha.

إِنْ هُوَ إِلَّا وَحْىٌ يُوحَىٰ ﴿٤﴾

5. Waxaana wax baray (oo xagga Eebe ka soo gaadhsiiyay) ku xoog wayn, (Malaku Jibriil).

عَلَّمَهُۥ شَدِيدُ ٱلْقُوَىٰ ﴿٥﴾

6. Ee caafimaad iyo quwaba leh, abuuriddiisuna egtahay.

ذُو مِرَّةٍ فَٱسْتَوَىٰ ﴿٦﴾

7. Wuxuu joogay jihadii sare (Jibriil).

وَهُوَ بِٱلْأُفُقِ ٱلْأَعْلَىٰ ﴿٧﴾

8. Kaddibna u soo dhawaaday kuna soo hoobtay (Nabiga).

ثُمَّ دَنَا فَتَدَلَّىٰ ﴿٨﴾

9. Intuu uga jirsado Qaanso (xadhiggeed) ama ka dhaw.

فَكَانَ قَابَ قَوْسَيْنِ أَوْ أَدْنَىٰ ﴿٩﴾